# Dhalashada Muwaadinimada Mareykanka (U.S.) Cadeynta Muwaadinimada Ilmahaaga

Naturalized U.S. Citizens: Proving Your Child's Citizenship

**!** Qaar badan oo ka mid ah foomamka USCIS waa ay isbedelayaan iminka! Ka eeg shabakada (USCIS website) si aad u hubiso in aad isticmaalayso foomkii ugu dambeeyey ka hor inta aadan waxba u dirin. Haddii aad u dirto foom khalad ah waxaa dhici karta inaad wax walba dib u bilowdo!

## Warqadan xogta aruursan ahi ma I caawin kartaa aniga?

Hadii aad tahay waalid caruur haysta oo aad qaadatid dhalashada Maraykanka, **xaaladaha qaarkood** caruurtaada aan haysan dhalashada Maraykanka iyagana waa la siinayaa. Xaaladan waxaa lagu magacaabaa caruurta "waalidkood ku qaatay" dhalashada. LAAKIIN weli waxaad u baahan tahay inaad dalbatid aqoonsiga sida warqadda dhalashada ama dal-ku-galka (passport), si'aad u CADAYSID in ilmahaagu dhalashada haysto. Xogtan urursani waxay ku siinaysaa macluumaad ah sidii aad ku heli lahayd aqoonsiyadaas.

Xogtan arrursan ee ku qoran warqadani kuma siinayso macluumaad ku saabsan sidii aad aqoonsiga dhalashada ugu heli lahayd caruurta ku dhalatay Maraykanka gudihiisa, caruurta waalidkood dhalashada Maraykanka haysto ee ku dhashay wadanka Maraykanka dibadiisa, ama caruurta ay soo korsadeen dadka dhalashada Maraykanka haystaa.

Xogtan aruursan ee ku qoran warqadani waxay ka hadlaysaa foomamka aad ka heli kartid barta internetka. Hadii aadan kombuyuutar haysan, waxaad isticmaali kartaa kombuyuutada yaala maktabadda dadwaynaha. Sidoo kale waxaad wici kartaa hay'dda magaceedu meesha ku qoran yahay waxaanad ka codsan kartaa inay foomamka kuu soo diraan.

## Marka Waalidku dhalshada qaataan caruurtooduna shuruud la'aan miyay dhalashada helayaan?

Waxaa laga yaabaa in Ilmuhu dhalashda Maraykanka haysto hadii uu DHAMAAN waxyaabahan soo socda uu hadda ama *hore* u kulansaday:



1. Hadii ilmaha da'diisu ka yar tahay 18 sano.

2. Hadii ilmuhu haysto sharciga (deganaanshaha rasmiga ah) ee Maraykanka (green card).

3. Hadii ugu yaraan labada waalid mid ka mid ahi uu Maraykanka ku dhashay ama dhalashada maraykanka qaatay. Hadii waalidka dhalashad haystaa uu yahay aabaha, isla markaana ayna isku mehersanayn hooyada ilmaha dhashay, la tasho qareen kuwa laanta socdaalka ah waayo waxaa dhici karta inaad u baahato cadeymo kale.

4. Waalidka dhalashada haysta ee laga hadlayaa waa waalidka ilmaha dhalay ee uu dhiigiisii yahay ama waalid **si sharci** ah ula wareegay mas'uuliyada ilmaha oo soo korsaday. Xaasku sharciga waalidka lagu qaato uma qaadi karto ilmaha ay ninkeeda naag kale u dhashay sidoo kale ninkuna uma qaadi karo ilmaha ay xaaskiisu nin kale u dhashay. Hadii aad dhalshada u raadinaysid ilma aad soo korsatay qareen la tasho waayo waxaa jira shuruuc gaar ah oo arintaa u degan.

5. Sidoo kale waa in waalidka dhalashada haysta iyo waalidka kale ay ilmaha mas'uul ka wada yihiin ama waalidka dhalashada haysta keligii mas'uuliyada ilmaha leeyahay uuna ku nool yahay Mareykanka (U.S.).

Hadii dhamaan arimahaasi sidaa u dhacaan, ilmahaagu shuruud la'aan ayuu dhalashada Maraykanka haystaa. Xataa haddii uu ilmahaagu hadda ka weyn yahay 18 sanno jir, haddii 5 ta waxyaabood oo dhami ay jireen oo ay run ahaayeen kolkii uu ka yaraa 18 jir ka, waxay u badan tahay in ilmahaagu uu toos u noqdo muwaadin Mareykan (U.S.) ah. Laakiin waxa aad u baahan tahay inaad hesho **cadeyn inaad muwaadin ah tahay ah.** Waxaad samayn kartaa inaad u soo qaadid **warqadda dhalashda** ama **dal-ku-galka (passport) buuga ah** ama **dal-ku-galka (passport). kaarka ah**.

**Ogow:** Hadii "ilmuhu" dhashay wixii ka horeeyay bishii Febraayo 27, 1983, waxaa laga yaabaa inay jiraan sharciyo kale oo qabanayaan. Sidaa darteed waxaad la tashataa qareen kuwa laanta socdaalka ah.

## Ilmahaygu wuxuu haystaa dhalashada maraykanka maxay yihiin aqoonsiyada ay tahay in aan u dalbo?

Waxaa wanaagsan inaad ilmahaaga u dalabtid dal-ku-galka (passport) i**yo** warqadda dhalashda. Tani waxay ka caawin kartaa ilmahaaga sidii uuna mustaqbalka wax dhib ah ula kulmeen. Laakiin kuma khasbanid inaad labadaba u dalabtid.





**Waqadda dhalashada** ee ay bixiso Wasaaradda arimaha Gudaha iyo amnigu weligeed ma dhacayso taariikh ay ku dhacdana ma laha. Wayna u shaqaynaysaa inta ilmahaagu nool yahay. Laakiin ilmahaagu wadanka banaankiisa *uguma* safri karo. Dhinaca kharashka dalbashada warqadda dhalashada ayaa aad uga qaalisan baasaboorka.

Hadii dakhligaagu hoseeyo waxaad buuxsan kartaa foom aad ku codsanaysid in lagaa cafiyo kharashka aad ku dalbanaysid warqadda dhalashada. Waxaa laga yaabaa inay adkaato in lagaa cafiyo kharashka aad ku dalbanaysid warqadda dhalashada. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *[Zam Tus Ngi them ua Ntaub Ntawv Immigration]()*.

Xataa haddii uu ilmahaagu hadda ka weyn yahay 18 sanno jir, haddii 5 ta waxyaabood oo dhami ay jireen oo ay run ahaayeen kolkii uu ka yaraa 18 jir ka, waxay u badan tahay in ilmahaagu uu toos u noqdo muwaadin Mareykan (U.S.) ah. Laakiin waxa aad u baahan tahay inaad hesho **cadeyn inaad muwaadin ah tahay ah** https://egov.uscis.gov/processing-times/.

**Dal-ku-galka (passport)** ay Wasaaradda Arimaha Dibadda ee Maraykanku siiso caruurta da'doodu ka yar tahay 16 sano wuxuu ku dhacaa mudo 5 sano dadka intooda kalana baasaboorkoodu wuxuu ku dhacaa mudo 10 sano ah. Waana in baasaboorka la cusboonaysiiyo markuu dhaco.

Baasaboorka dalbashadiisa ayaa ka raqiisan, dalbashada warqadda dhalashada. Kharashka dalbashada baasaboorka, marnaba lagaama cafinayo. Inaad baasaboorka heshid waxay kugu qaadanaysaa mudo 11 usbuuc ah ama ka yar.



Ilmahaagu wuu ku safri karaa baasaboorka.

- Dal-ku-galka (passport) **kaararka ah** waxaad ugu safri kartaa wadamada Maraykanka la leh xuduuda dhulka ah ama badda, *laakiin safar diyaarad la raacayo oo wadanka dibadiisa* loo baxayo uma isticmaali kartid baasaboorka kaarka ah.

- Baasaboorka buuga ah meesha aad doonto ayaad ugu safri kartaa.

## Dalbashada warqadda dhalashada (N-600)

Hadii aad tahay qof waalid ah oo haysta dhalashada Maraykanka, caruur aan qaan gaadhina kuu joogaan caruutaada waad u dalbi kartaa **warqadda dhalashada**. Waxaad u baahan tahay inaad buuxisid foomka la yiraahdo N-600 si'aad caruurta ugu dalabtid warqadda dhalashada. Hadii ilmahaagu da'doodu ka wayn tahay 18 sano waa inay iyagu foomka saxiixaan.

Hadii aad tahay ilmo ay dhaleen waalid dhalashada Maraykanka haystaan, adiga laftaada ayaa buuxsan kara foomka N-600.

## Xageen ka heli karaa foomka N-600?

1. Ka hel foomka N-600 (Form N-600) khadka (online) www.uscis.gov/n-600.

2. Foomka buuxi adigoo ku buuxinaya macluumaadka shakhsiga ah ee ilmahaaga, sida Meesha uu ku dhashay, da'diisa, sharciga uu haystaa nooca uu yahay, cinwaanka uu degan yahay iyo macluumaadka waalidka.

3. Foomka aad soo diraysid waa inaad soo raacisid waxyaalahan soo socda:
   - Lacag dhan $ 1,385 ah kharashkii diiwaan gelinta oo aad ka soo dhigtid Jeeg ama jeega idman (money order) waxaanad ku soo qoraysaa "U.S. Department of Homeland Security." Waxa aad ku bixin kartaa kaarka amaahda (credit card). Waxa aad u baahan

tahay inaad isticmaasho Foomka G-1450 (Form G-1450) si aad tan u samayso. Foomku waxaa uu ku jirtaa barta https://www.uscis.gov/g-1450. Hadii dakhligaagu hooseeyo buuxi foomka I-912 si aad u codsatid in lagaa cafiyo kharashka diiwaan gelinta. Foomkan waxad ka helaysaa barta internetka waxaanad ka geli kartaa halkan www.uscis.gov/i-912. Hadii codsigaa la aqbalo uma baahnid inaad wax lacag ah bixisid.


- Waxaad soo raacisaa 2 sawir oo dhowaan laga qaaday ilmahaaga oo nooca dal-ku-galka ah (passport) loogu talagalay ah. Waxaa jira shuruudo go'an oo laga doonayo inay buuxiyaan nooca sawirada ee dal-ku-galka ah (passport) loogu talagalay. Waa inaad hubisid in qofka sawirada qaadayaa yahay qof yaqaana sida loo qaado sawirada noocan ah. Barta internetka ee hay'adda socdaalka (USCIS) waxaad ka gashaa halkan www.uscis.gov waxaad halkan ka helaysaa qayb ka hadlaysa macluumaad ku saabsan sawirada baasaboorada.

- Sawir aad ka qaaday kaarka deganaanshaha rasmiga ah ee ilmahaaga

- Nuqul ah warqadaadda dhalashadda iyo sawir aad ka qaaday warqadii dhalashada ee ilmahaaga.

- Cadayn tusaysa inaad adigu dhalashada Maraykanka haysatid sida warqadda dhalashada ama dal-ku-galka ah (passport).

- Cadayn tusaysa inaad ilmaha waalidkii tahay isla markaana kula noolyahay ama kula noolaan jiray Mareykanka (U.S.).
  **Tusaale:** aqoonsiyada ama cadaymaha aad soo dirikatid:
  - amar maxkamadeed oo cadaynaya cida ilmuhu la noolaanayo.
  - Diiwaanka iskuulka
  - Heshiisyadii aad guryaha ku kiraysatay
  - canshuurtii aad xaraysay
  - Warbixinta xafiiska gargaarka dadweynaha, iwm.



- Cadayn tusaysa inaad si sharci ah ilmahaaga mas'uul uga tahay ama uga ahaan jirtay.
  **Tusaale:** aqoonsiyada ama cadaymaha aad soo dirikatid:

  - amaro maxkamadeed oo ah cida ilmuhu la noolaanayo
  - amarka furiinka maxkamada
  - warqadda nikaaxa

Waxaa jira dukumiintiyo kale oo aad u baahan tahay inaad dirto. Waxaa ku jira sharaxaadyo buuxa oo ku saabsan waxa ay tahay inaad ku darto tilmaamaha N-600 barta www.uscis.gov/n-600. Hoos u wad ilaa aad ka gaarayso ["Forms and Document Downloads."] La tasho qareen haddii aadan hubin dukumiintiyadda ay tahay inaad soo dirto.

4. Ka xaree foomka khadka (online) ka adigoo isticmaalaya tilmaamaha ku qoran shabakada (website), AMA soo dir kuwa qaabka xaashida ah. Haddii aad ku soo dirto boostadda U.S. ku soo hagaaji ciwaanka ah:

   USCIS
   Attn: NATZ
   P.O. Box 4088
   Carol Stream, IL 60197-4088

Haddii aad ku soo dirto FedEx, UPS, ama DHL, ku soo hagaaji ciwaanka ah:

   USCIS
   Attn: NATZ (Box 4088)
   2500 Westfield Drive
   Elgin, IL 60124-7836

## Maxaa dhacaya hadaanan haynin qaar ka mid aqoonsiyada iyo cadaymaha la raacinayo foomka N-600?

♦ Hadii aadan sawir ka hayn **kaarka deganaanshaha rasmiga ah** ee ilmahaaga, waxaad raadisaa inay jirto hay'ad hada ka hor sawir ka qaaday kaadhka, sida, iskuul, xafiiska gargaarka dadwaynaha, qareen, ama goob shaqo.

Hadii aad meelahaas oo dhan ka waydid sawirka kaarka, ilmahaagu wuxuu laanta socdaalka ka codsan karaa inay sawirka kaarkiisa u soo diraan. Markaa si'aad u codsatid sawirka kaarka waxaad buuxisaa foomka la yiraa codsiga xorta ah ee macluumaadka (FOIA), Foomka numberkiisu yahay G-639. Si'aad u heshid foomka FOIA waxaad booqataa barta internetka ee www.uscis.gov/g-639. Waxaa dhici karta inay qaadato dhowr asbuuc inaad jawaab ku hesho haddii aad ku xareysato khadka (online). Waxa ay qaadan kartaa dhowr bilood haddii aad xareysato adigoo iyadoo qaab warqad ah u diraya.

Sidoo kale waxaad codsan kartaa in kaar cusub laguu soo diro. Si'aad kaar cusub u codsatid waxaad buuxisaa foomka la yiraa I-90 si laguugu soo diro kaar deganaanshaha rasmiga ah. Waxaa lagaa doonayaa inaad bixisid lacag dhan $465 ama waxaad codsataa in kharashka dalbashada lagaa cafiyo. Akhri xogtan aruursan ee *Bedelida ama Cusboonaysiinta Kaarkaaga Deganaanshaha Rasmiga ah ("Green Card")*.

♦ Hadii aad waydid sawirkii **warqadda dhalashada** ee ilmahaaga waxaad u baahan tahay in 2 qof oo goob joog ahaa markii ilmahaagu dhashay uu midwaliba kuu qoro warqad uu ku cadaynayo inuu goob joog ahaa dhalashada ilmahagaa adiguna aad tahay waalidka ilmaha dhalay.

Qofka warqada markhaatiga dhalashada kuu qorayaa waa inuu ku qoro warqada macluumaad faahfaahsan oo shakhsiyadiisa ku saabsan sida, magaciisa, cinwaanka uu degan yahay, nooca uu yahay sharciga uu haystaa iwm. Sidoo kale waa inay qoraan ilmaha magaciisa oo sedexan iyo waalidiintiisa magacyadooda, taariikhda dhalashada ee ilmaha iyo sida ay ku ogaadeen ilmahaaga iyo dhalashadiisa. Sidaa si la mid ah hadii labada waalid ee ilmaha dhalay ay is

qabaan laakiin ayna haysan warqadda meherka, markhaatiyadu waa inay qoraalkooda ku daraan in labada waalid is qabaan.

Warqadan markhaatiga ah waxaa la rabaa in lagu saxiixo markhaati sharciyaysan oo nootaayo haysta hortiisa kadibna waa inuu nootayadda ku dhuftaa.



♦ Hadii ay kaa luntay sawirkii **warqadda dhalshadu** ee Maraykanku, si’aad u heshid cadayn tusaysa warqadaada dhalashada waxaad laanta socdaalka ka dalban kartaa inay kuu soo diraan diiwaankaaga yaala laanta socdaalka waxaanad buuxinaysaa foomka la yiraahdo FOIA (maacluumaadka foomkuna kor ayuu ku qoran yahay).

Ama waxaad soo buuxin kartaa foomka N-565, loogu talo galay dib u cusboonaysiinta warqadda dhalashada iyo aqoonsiyada kale ee dhalashada Maraykanka. Foomka waxaad ka helaysaa halkan www.uscis.gov/n-565. Si aad u codsatid in warqadda dhalashada Maraykanka laguu soo diro waxaa lagaa doonayaa inaad bixisid lacag dhan $555, ama waxaad codsataa in lacagta lagaa cafiyo.

**Ogow:** Hadii ay da’daadu 18 sano ka wayn tahay oo aad adigu shakhsiyan dalbanaysid, isla markaana ay waalidiintaa oo haysta warqadda dhalashada Maraykanka ay kuu diidaan inay ku siiyaan sawirka warqadooda dhalashada waa inaad qareen wacdid. Qareenka ayaa kaa caaawinkara inuu amar maxkamadeed sawirka warqadda kaagaga soo qaado.

Waxaa laga yaabaa inaad buuxin kartid foomka N-600 xataa hadii aad waydid kaarkii deganaanshaha rasmiga ahaa ee ilmaha ama warqadaadii dhalashada ee Maraykanka (U.S.). Macluumaadkan waxaa laga helayaa kaydka Wasaaradda Amiga ee wadanka Maraykanka (U.S.). LAAKIIN codsigaaga way diidi karaan hadaadan raacin sharciyada iyo aqoonsiyada loo baahan yahay sidaa darteed waa inaad dirtid hadii aad heli kartid.

## Yaan wacayaa hadii aan weli Caawimo u baahnahay?


| | |
|---|---|
| Arrive Ministries | (612) 798-4332 |
| Immigrant Law Center of MN | 1-800-223-1368 |
| International Institute | 651-377-8642 |
| Lutheran Social Services | 612-879-5258 |
| Minnesota Council of Churches | (612) 874-8605 |
| Mid-Minnesota Legal Aid | 1 (877) 696-6529 |
| Park Avenue Walk-in Legal Clinic | 3400 Park Avenue S, Minneapolis. Maalin walba oo Khamiis ah ka hel talo qareen 3-5 galabnimo |

## U Dalbida Dal-ku-Gal (Passport) Ilmahaaga

Muhiim ma aha inaad adigu dhalashada Maraykanka haysatid marka aad ilmahaaga baasabboorka u dalbaysid. Laakiin maadaama oodan adigu haysan dhalashada Maraykanka waxaa lagaa doonayaa inaad keentid cadayn muujinaysa in waalidka kale eed ilmaha wada dhasheen uu haysto dhalashada Maraykanka (U.S.). Habka loo marayo dalbashada baasaboorka buuga ah iyo baasaboorka karaka ahi waa isku mid. Laaakiin kharshka lagu dalbanayo ayaa kala badan. Baasaboorka caruurta da'doodu ka yar tahay16 sano wuxuu ku dhacayaa mudo 5 sano ah. Laakiin haday da'daadu tahay 16 jir ama aad ka wayn tahay baasaboorkaagu wuxuu shaqaynayaa mudo 10 sano ah.

## Sideen ilmahayga baasaboorka ugu dalbaa?

1. Booqo bogan: http://travel.state.gov/content/travel/en/passports.html.



→ Hoos u jiid ilaa aad gaartid meesha oranaysa "Get or replace a passport" kadibna dooro da'da qofka aad u dalbaysid

2. Halkan ayaad ka helaysaa foomka Form DS-11: Application for a U.S. Passport. Waxaad kala doorataa inaad barta internetka ka buuxisid iyo inaad foomka daabacatid ood gacanta ku buuxisid (PDF). Hadii aad barta internetka ka buuxisid waxaad maraysaa talaabooyin isku xig xiga oo midiba mida kale kuu gudbinayso.

   Ama waxaad tegi kartaa xafiiska foomamka laga soo qaato oo aad ka soo qaadan kartaa. Sidoo kale xafiisya badan oo kuwa boostada Maraykanka ah, xafiiska degmada aad degan tahay, iyo xafiisyadda gobolka ee laysanka gaariga lagu wado bixiya dhamaan meelahani way bixiyaan adeega baasaboorada. Si'aad u ogaatid goobta kuugu dhow waxaad booqataa bartan internetka, http://iafdb.travel.state.gov ama waxaad wacdaa 1 (877) 487-2778.

3. Foomka waxaad ku buuxisaa macluumaadka ilmahaaga sida, meesha uu ku dhashay, da'diisa, macluumaadka waalidka iyo cinwaanka uu degan yahay.

4. Waxyaalahan sii qaado markaad u socotid xarunta ama goobta aad foomka ku buuxinaysid

   a. **Cadayn muujinaysa in ilmaha uu waalidkii dhalashada Maraykanka u qaaday,** oo ay la socdaan **DHAMAAN** aqoonsiyada iyo cadaymaha loo baahan yahay marka la buuxinayo foomka N-600. Waxyaabahan hoos ku qoran ayaa cadayn noqon kara:
      - Sawirka karaka degenaanshaha rasmiga ah ee ilmahaaga.
      - Sawirka warqadda dhalashada ee ilmahaaga hadii aad haysid
      - Cadayn muujinaysa in adiga (ama waalidka kale ee ilmahu) haysataan dhalashada Maraykanka sida warqadda dhalashada.

- Cadayn muujinaysa in waalidka dhalashada Maraykanka haystaa uu yahay waalidki ilmaha dhalay, uu ilmahu la nool yahay ama uu la noolaa waalidkaa joogay Maryekanka (U.S.), isla markaana waalid kaasi haysto cadayn ah inuu si sharci ah isagu ilmaha mas'uul uga yahay.

**Ogow**: Hadii ilmuhu mar hore warqadda dhalashada ku qaatay nidaamka N-600 aqoonsigaa keliya ayaa ku filan marka aad dal-ku-galka (passport) u dalbanaysid.

b. **Aqoonsiyo Cusub** ayaa laga rabaa labada waalid iyo ilmahaba hadii wax aqoonsi ah loo baahdo [akhri qoraalka hoose "Sidee ayay ilmahayga da'diisu saamayn ugu yeelan kartaa dalbashada dal-ku-galka (passport)?"]. Aqoonsi (I.D) waxaa noqon kara laysanka gaariga lagu wado, warqadda dhalashada Maraykanka ama aqoonsiyo kale oo ay dawladdu bixisay.

c. **Kharashka Dalbashada** [akhri qoraalka hoose "Sidee ayay ilmahayga da'diisu saamayn ugu yeelan kartaa dalbashada dal-ku-galka (passport)?"

d. **1 sawir oo ah nooca dal-ku-galka (passport). loogu talagalay** oo ilmahaaga laga qaaday. Sawirka baasaboorka loogu talagalay waa inuu buuxiyaa shuruudo go'an. Sidaa darteed waa inaad hubisid in qofka sawirka qadayaa yaqaano sida loo qaado. Barta interrnetka ee laanta socdaalka ee Marayka (USCIS) halkan ka gal www.uscis.gov waxay leedahay qayb ka hadlaysa sawirka dal-ku-galka (passport).

## Sidee ayay ilmahayga da'diisu saamayn ugu yeelanaysaa dalbashada Dal-ku-Galka (Passport)?

Caruurta ay da'doodu tahay **18 sano ama ka wayni** iyaga ayaa kiligood dalban kara, iyagoo raacaya talaabooyinka aan kor ku soo sheegnay. Way dalban karaan hadii ay dhalashada Maraykanka ku qaateen waalidkood *ka hor* intii aanay da'doodu gaarin 18 sano. Waa khasab inay dalbadaan iyagoo xaadir ah dal-ku-galkooda (passport) marka ugu horeeysa. Kharashka lagu dalbanayo baasaboorka buuga ahi waa $165 baasaboorka kaarka ahna waa $65. Toban sano ka dib ayayna dhacayaan.

Caruurta ay da'doodu tahay **16 ama 17** sano waxay u baahan yihiin inay ogolaansho ka helaan waalidkood ama dadka mas'uulka ka ah si'ay u dalbadaan baasaboorka marka ay dalbanayaana waa inay xafiiska laga dalbado tagaan. Sidoo kale waa inay xafiiska baasaboorada keenaan qoraal ogolaansho ah oo uu qoray labadooda waalid mid kood ama qofka mas'uulka ka ahi waxaa kaloo laga rabaa inay keenaan sawirka aqoonsiga (I.D.) waalidka iyo aqoonsigooda (I.D). AMA waxaa raaci kara waalidka ama qofka mas'uulka ka ah iyagoo aqoonsigooda wata (I.D). dal-ku-galka (passport) buuga ah qiimihiisu waa $165 baasaboorka kaarka ahna waa $65. Toban sano ka dib ayayna dhacayaan.




Ilmaha ay **da'diisu ka yar tahay 16 sano** marka uu baasaboorka dalbanayo waa inuu xafiiska tagaa oo ka dalbadaa. Adiga iyo

dhamaan **waalidka ilmaha ama dadka mas'uulka ka ahi waa inay raacaan oo ay xafiiska tagaan.** Adiga iyo waalidka kale ama qofka mas'uulka ka ahi waa inay soo qaataan aqoosigooda (I.D). Baasaboorka buuga ah qiimihiisu waa $135. Dal-ku-galka (passport) kaarka ahna waa $50. Dal-ku-Galka (Passport) buuga ah ama kan kaarka ahi waxay shaqaynayaan shan sano keliya.

## Maxaa dhacaya hadii labada waalid midkood aanu tegi Karin xafiiska Dal-ku-Galka (Passport) laga dalbanayo?

Hadii adiga ama waalidka kale aanu ilmaha u raaci Karin xafiiska baasaboorada laga dalbado waa in waalidka aan goobta tegayn uu buuxiyo foomkan Form DS-3053 Statement of Consent: Issuance of a Passport to a Minor Under Age 16.

Foomka DS-3053 waxaad ka helaysaa barta internetka ee http://travel.state.gov/content/travel/en/passports.html




→ Hoos u jiid ilaa aad gaadhid meesha oranaysa "Prepare to apply"
→ Guji halkan "Fill out your form and print it"
→ Hoos u jiid ilaa aad gaartid meesha oranaysa "Forms for Special Situations"
→ Guji halkan "Statement of Consent for Issuing a Passport to a Child (DS-3053)"

Sidoo kale foomka DS-3053 waxaad ka heli kartaa xafiiska laga soo qaato foomamka baasaboorada. Marka foomka la buuxiyo waa in lagu saxiixo markhaati sharciyaysan oo nootaayo haysta hortiisa. Waxaa kale oo lagaa doonayaa inaad haysatid sawir labada dhinacba ah oo laga qaaday waalidka aan kula socon aqoonsiyadiisa. Ka dibna foomk aad buuxisay iyo sawirada aqoonsiyadaba waxaad gaysaa xafiiska dal-ku-galada (passport) laga dalbado.

**OGOW:** Hadii labada walid midkood dhintay, waxaad keentaa warqaddii cadaynta dhimashada ama qoraal markhaati ah nootaayo leh oo xaqiijinaya geerida.

**Hadii aad tahay waalidka keliya ee ilmaha mas'uulka ka ah** waxaad keentaa amar maxkamadeed oo cadaynaya inaad keligaa ilmaha mas'uuliyadiisa leedahay. Hadii aad tahay hooyada ilmaha dhashay isla markaana ay daan is qabin aabihii ilmaha dhalay, waxaad arintaa ku xaqiijin kartaa inaad keentid warqadda dhalashada ee ilmaha oo magaca hooyada keliya ahi ku qoran yahay.

Haddii aabahu uu ku qoran yahay warqadda dhalashada, adiguna aad tahay qofka kaligii haya ilmaha laakiin aysan maxkamaddi kuu xukumin taa, waxaa jira foomam maxkamaddu leedahay oo aad isticmaali kartid si ay kaaga caawiyaan inaad hesho dal-ku-galka (passport).
Gal barta: https://www.mncourts.gov/



→ Click on "Get Forms"
→ Click on "Family"
→ Click on "Passport-only Relief for Unmarried Mothers"

Hubi inaad akhrido tilmaamaha.

Hadii aadan haysan dhamaan waxyaalahaas oo dhan waxaad buuxin kartaa foomka Form DS-3053 si'aad isugu daydid inaad xaaladaada sharaxdid.


## Maxaa dhacaya hadii aanan keligay lahayn mas'uuliyada ilmaha aniga iyo waalidka kalana dhib na dhextaalo oo aanan saxiix ka heli Karin?

Hadii aadan mas'uuliyada ilmaha keligaa lahayn waalidka kalana saxiixi Karin ama diido inuu saxiixo foomka DS-3053 waxaad siinaysaa warbixin qoraal ah oo nootaayo leh waxaanad buuxinaysaa waxa aad siin kartaa oraah sharciyeysan oo nootaaye leh oo sharaxda sababta waalidka kale aan loo heli karin. Waxa aad u baahan tahay inaad adeegsato Foomka la yiraa Form DS-5525. Tusaale Sababaha waalidka kale loo waayay ee uuna u saxiixayn foomka waxaa ka mid noqon kara sida:



- maxkamad ayaa xukuntay in la'idin kala badbaadiyo oo idin kala fogaysay, ama
- inaadan garanayn meesha waalidka kale laga helo.

Foomka DS-5525 waxaad ka helaysaa bartan internetka halakn ka gal: http://travel.state.gov/content/travel/en/passports.html.




→ Hoos u jiid ilaa aad gaartid meesha oranaysa "Prepare to apply"
→ Guji halkan "Fill out your form and print it"
→ Hoos u jiid ilaa aad gaartid meesha oranaysa "Forms for Special Situations"
→ Guji halkan "Statement of Special Family Circumstances (DS-5525)"

**LAAKIIN** Hay'adda foomamka kaa qabanaysa ayaa go'aaminaysa inay codsigaaga aqbalaan iyo in kale. Intaa waxaa dheer, ma jirto cid kuu balan qaadi karta in sharaxaada aad bixisay la aqbalayo. Waxaa dhici karta in hal foom ood gaysay laba xafiis oo kala duwan oo kuwa foomamka qabta ah inay laba go'aan oo kala duwan ka kala qaataan isla halkii foom. Sida ugu wanaagsan eed kaga hortegi kartid inaad saxiixa waalidka kale u baahataa waa inaad maxkamada arimaha qoyska ka codsatid inay kuu xukunto inaad keligaa ilmaha mas'uuliyadiisa leedahay kadibna maxkamadu kuu xukunto.

## Maxaa dhacaya hadaanan haysan qaar ka mid ah aqoonsiyadan iyo sharciyadan la'iiga baahan yahay si'aan baasaboorka u dalbado?

Hadii aadan heli Karin sawirka warqadda dhalashada ee ilmahaaga waxaad raadisaa qof kula joogay markuu ilmahaagu dhashay foomkana ha kuu buuxiyo Form DS-10 Affidavit of Birth.

Raadi foomkan DS-10 waxaad ka helaysaa barta intenetka https://eforms.state.gov/



→ Guji halkan "DS-0010"

Sidoo kale, waxaa lagaa doonayaa inaad soo qaadatid wax kasta oo aqoonsi ah oo aad soo qaadan kartid kuwaas oo ay ku qoran yihiin magaca ilmaha, taariikhda uu dhalashay, iyo shay ay labada waalid magacyadoodu ku wada qoranyihiin. Waxyaabahaas waxay noqon karaan sida:


- warqadda kaniisadu bixiso
- warqaadda dhalashada ee isbitaalku bixiyo
- Diiwaanka tirakoobka
- Qaybo wargayska ka mid ah oo la soo gooyay
- diiwaanka caymiska
- diiwaanadii iskuuladii u hooreeyay ee ilmaha la qoray
- diiwaanka kitaabka qoysku kala dhaxo
- diiwaan dhakhtarka ee tusinaya dawayntii ilamaha markuu dhashay ka dib loo sameeyay

Sidoo kale waxaa lagaa doonayaa in dadka waawayni aqoonsiyadooda soo qaataan (I.D). Aqoonsiyadaas waxaa noqon kara waxyaalahan soo socda:

- laysinka gaariga lagu wado oo shaqaynaya
- aqoonsiga milateriga
- aqoonsiga ay dawladdu bixisay
- dal-ku-gal (passport)
- dhalashada maraykanka ama warqaddii dhalashada Maraykanka ee lagu siiyay
- kaarka deganaanshaha rasmiga ah

Hadii aadan haysan wax ka mid ah dhamaan aqoonsiyadaas (I.D.), waxaa Khasab ah inaad haysatid ah wax kale oo lagugu aqoonsado IYO markhaatiyo ku cadeeya qofka aad tahay. Qofkaasi waa inuu ku yaqaanay 2 sano, isla maraakana yahay qof haysta dhalashada Maraykan ama uu haysto kaarka deganaanshaha rasmiga ah, haystana aqoonsiyo shaqaynaya buuxiyana "foomka DS-71 oo ah qoraal markhaati ah oo nootaayo leh uu ku cadaynayo qofka aad tahay "kuna buuxiyo sarkaalka xarunta dal-ku-galka (passport) hortiisa. Foomka DS-71 kama helaysid barta internetka. Qofka markhaatiga kuu ahi waa inuu kuu raaco xafiiska dal-ku-galka (passport). Foomamku xafiiska ayay yaalaan.

Hadii aadan haynin kaarkii deganaanshaha rasmiga ah ee ilmahaaga ama warqadii dhalashada Maraykanka ee waalidka akhri qoraalka kore ee (bogga 4aad) ama hoos "Maxaa dhacaya hadaanan haynin qaar ka mid ah aqoonsiyada la iiga baahan yahay foomka N-600?"



**Maxaan sameeyaa hadaan su'aalo kale qabo ama dhibo kale iga haystaan Dal-ku-Galka (Passport) ilmahayga?**



Waxaad wacdaa xafiiska hay'adda baasaboorada ee Minneapolis hadii aad dhib la kulantid ama laguu soo diiday baasaboorka. Sidoo kale wac xafiiska hay'adda dal-ku-galka (passport) hadii aad u aragtid in kiiskaagu yahay mid isku murugsan doonaysidna inaad ka hor tagtid inaad wax dhibaato ah kala kulantid xafiiska degaanka ee foomka lagu buuxiyo. Waxay xirfad dheeraad ah u leeyihiin sidii dal-ku-galka (passport) si (degdeg ah) laguugu siin lahaa. Markaad wacdid fariinta meesha lagu duubay waxay ku oran doontaa si laguugu dedejiyo baasaboorka waa inaad tahay qof safar dedeg ah u baxaya. Hadii aadan degdeg u baxayna balan samayso. Kharashka adeega wuxuu noqonayaa qiimihii dal-ku-galka (passport) caadiga ah lagaa qaadi lahaa oo lagu daray $ 60 oo dheeraad ah.

Hay'adda dal-ku-galka (passport) ee Minneapolis: 1 (877) 487-2778
(Minneapolis Passport Agency)
212 Third Ave. S.
Minneapolis, MN 55401

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**